

MARKII DHUL-GARIIR DHACAYO

**HOOS-U-
FOORARSO**



DABOOL



QABSO



WWW.CIVILDEFENCE.GOV.T.NZ



Markii uu dhul-gariir dhacayo

HOOS-U-FOORARSO, DABOOL, QABSO

Dhammaan New Zealand waxay khatar u tahay dhul-gariiro. Ogaanshaha falka degdegga ah oo saxdaa oo la qaado wuxuu ka hortagi karaa dhaawaca wuxuuna badbaadshaa nololaha.

Markii uu dhul-gariir jiro, Foorarso, Dabool, Qabso. Sidaani waxay kaa joojinaysaa in wax korka kaaga dhacaan, waxay kaa dhigaysaa hadafka yar ee waxyaalaha soo-dhacaya ama duulaaya, waxayna ilaalinaysaa madaxaaga, qoortaada iyo xubnahaaga muhiimka ah.

- **HOOS-U-FOORARSO** adoo gacmahaaga saaraya jilbahaaga. Taasi waxay kaa ilaalinaysaa inaad dhacdo waxayna kuu ogolaanaysaa inaad dhaqaaqdo haddii aad u baahato.
- **DABOOL** madaxaaga iyo qortaada (ama jidhkaaga oo dhan hadday suurtagal tahay) adoo hoos-galaya miis ama dheeskiga adag (haddii ay dhowr tallaabo kuu jiraan). Haddii uusan jirin hoy kuu dhow, madaxaagana iyo qortaadana ku dabool gacmahaaga iyo calaacalahaaga.
- **QABSO** hoyga (ama meeshaada si ay u ilaaliso madaxaaga iyo qoortaada) ilaa gariirku istaagto. Haddii gariirku wareejiyo hoygaaga, la-dhaqaaq.

Haddii uusan jirin gabaad kuu dhow, ku-gurguuro gudaha geeska qolka waxaadna ku dabooshaa madaxaaga iyo qoortaada gacmahaaga iyo calaacalahaaga. Dibada ha u ordin ama ha istaagin iridka. Dad badan ayaa ku dhaawacma intay isku dayayaan inay socdaan INTUU-SOCDO gariirku. Waxaa ammaan ah in Hoos-la-isku-dhigo, Daboolo, Qabsado ilaa uu gariirku dhammaado.

Samee qorshe maanta. Ogsoonow cidda ku caawin karta iyo cidda laga yaabo inay u baahan tahay caawimaadaada. Kooxda Maaraynta Degdegga Difaaca Shacabka ayaa kuu haysa macluumaadka gobolkaaga.

Civildefence.govt.nz

